

Maanta bishu waa toddoba, halka kan waxaa fadhiya oo isugu yimid rag dhowr ah oo uu ka mid yahay Shiikh Maxamed Axmed Liibaan, Salaad Cangul, Aw Daahir Afqarshe, Cabdi Dhegaweyne iyo Fiqiburaale oo noqondoona qaybiye. Waxaynuna ka hadlaynaa maanta haddii Ilaahey idmo sida dadku wax u aaso, saynu ogsoonahay umadaha adduunku wey kala duduwanyihiin muslim iyo gaalo, cawaan iyo mulxidba wey leeyihiin; iyadoo sidaas ay tahay dadka muslimka ruuxisu qolo waa siday wax u aasataa, inkastoo guud ahaan isku mid yihiin bal haddii aynu dib ugu noqonno sida Soomaalidu wax u aasato ama ay u hagaajiso meykdu marka ay naftu ka baxdo innagoo ugu horreysiinayno aynu kala soocayno xagga diinta inooga bilaabo oo siday Soomaalidu wax u aasato oo ay diintu qabto oo caadada ka duwan bal saas awgeed waxaan u gudbinayaa Shiikh Maxamed Axmed Liibaan oo inoo micnayn doona. Shiikh Maxmedow tafaddal.

Shiikh Liibaan Fiqiburaalow waad mahadsantahay meeshaasu umadu Ab Aadan iyo yoonkaan beriga aho la joogo intii ka dhexeysay kolba waa is aasi jireen, hadba heeray mari jireen, qabiil iyo habiil isdilkoodi aasidda siday u bilaabatay oo ayadoon la aqoonin qaabiil markuu haabiil dilay isagoo maydkii aasi aqaan waayey Ilaahay u soo bixiyay laba take ee uu mid midka kale dilay ee uu godkii ugu qodaayo, gafuurka ayuu si yiri, walaalka sida tukahaasu sokeysay caada lagu duugayaa iyo cilmi lagu duugayaa is aasid umadda dhex tiil, aan uga soo galno mugga sidii annagu aan soo gaarnay ama curfiga banii aadamka u yaala ay curfi ahaan wax uga dugtaan ama cilmi ahaan wax ugu dugtaan, ama isku jir ahaan curfi iyo cilmigii oo wada socdaa ilaa haddii curfigii dad cilmi lihi oo wax ku aasi tago cilmigii iyo curfigii waa isku jiraan markaasaa waxaa kuu muuqanaysa caadadii wax lagu duugi jirayna wey u eg tahay cilmigii kutaabka heyadii ku tiil waa ku caddahay, umaddu ayadoo islaam ah oo ahlu sini ah ay wax aasi tagto curfi waxaa ay ka dhigtee iyo cilmigu waxaa uu qabaa waa isku mid illaa jahli meeshaa ma yaalo, curfi iyo jahli waxaa lagu kala fiirin karaa meel jahli maahine wax kale aan aqoon umadda samani jaahiliyaddii siday wax u aasi jireen, waxaa ka mid ahaa inay god sidiisa ah in dadka loo qodo yaa gabal curfigu ahaa, xujuubkaan shaqiga ah oo in la dhan balo oo dhanbillada loo jeediyo qorraxdana madaxiisa la xejiyo meeshay ka soo baxdo, meeshay u dhacdaan lugaha la xejiyo wejigana qafladda la aadiyo shaqina uu yahay uu dhanbalan yahay oo ninka jifkiisuna yahay waa hey'ad waxaa ka horreysay dad ceel qoda oo ceelkaa ay qodaayaan dadka marka uu meydo godka la qodaayaa hey'adda uu e yaal yaa meykdu lagu tabteeyaa, nimankii ceelkaa qodi jiray waxay oran jireen qofku hadday maydo xibnuhu yey kala fidsamine laaba, war lugaha soo laaba, war isu dhawee, xusulka iyo gacanta sidaa u soo kaliya, lugta ina soo laabtii shanshada barida ku dhejiya si uu godkaa ceelka ah oo la qodayo uu qofka u le'ekaado marka iilkii la seexinmaayo, qofku seexinmayso xarig bey luqunta ka gelinayaan iyo xaglaha,

xariggaas midka gacanta lagu haysto ma ahee midka kaleeto gunud ma leh afkiisu, waa gunud la'yahay sidaasaa inta loo qaado oo godka la geeyo awalba la le'ekeeye jiriddii mugga la dhigo yaa xariggii meesha gunnada lahayd lagu dhego yaa laga daliliqsanayaa yaa laga siibanayaa asaa asagoo dadkii ku jira yaa xariggii laga soo siibtay, haddii ilmuhu uga cayaaraan xarkaha waxaay oran jireen dadkaas hore madaxaa lagaa gelin, xaglaha lagaa geli waa dhimo oo xariggii xaglaha, lagaa geliyay godkii lagula geliye, inay curfi hore ahayd saasaa lagu gartay. Hadduu dhaarranayo war xarigii xaggaad iiga waxaysay, war Ilaahow haglaha la iga gasho xariggaagi anigu aanan kaala maclin, meelna aanan kaa geynin oonan kaa dhmin, xaglaha Allow la iga galsho, xagla gelintaasi waa sidii loogu aasi jiray xarigga quburo hore oo aas aaskii hore ah oo semanu aakhirkaan markii la haleelay sida wax loo duugo oo shaqiga kan dhan balka ah oo jifkaa la helay intii ka horreysay dadku is aasi jiray oo hayjadahaas dibadda isku aasi jiray arki maysid, xabaal fidsan, xabaal qorigii sidaa ugu goobaaban yahay oo ceelkii dhilaha qoryihii lagu meeriyay oo hadaad fiirido saddex dhudhun asaga o dhan dhamayn yad arkeysaa hayaddii wax lagu duugi jiray saasaay ahayd, saasaad ku garanaysaa, in quwuurta aaskeedu siddas ahaa isla markaas agas waa dhihi jireen, waxaa lagu qalaayo axna waa yiraahdiin oo waa oran jireen, magayo badan liigshi wax leh aa aasidiisa loo dadaalaa si looga helo, ijaaro duugtaas laga qaato xoolaha hadduu ka dhaqaalo dareeyo waalidka ha iiga cayaarin xoolaha xabaalkaaga laguma soo xiro. Xabaalka xoolo ku xiroo daaqaayo looga tagaayo ma ahee waa xoolihii lagu aasaayay oo meesha lagu soo xiray qofka lagu duugaayo oo in lagu qasho yaa la rabaa maxaa yeelay ninku hadduusan wax tacban wuxuu yiraahdaa xoolo ma lihiyo caawa hal neef bal hal ... la iga dhaxlo ee neef la iigu qori jiido ma qabo. Qori jiid isla markaas maahmaahbaa u taala oo ninku hadduusan dad lahayn oo wax uu dhalay lahayn, xoolana meesha ugu xirnayn, xabaalkiisa lagama dadaalo, qoryaha teellan oo tirada badan oo bahalku mari karin xabaal furaha ah, bahal waxaa qota xabaallaha haddaan laga oodin xabaal fure la yiraah. Xabaalaha bahalka fura ooddu ma celiso shishe intuu taguu furaayaa godka hadduu qorigaas mudan oo degebada ah ama waa maraay ama yucub ama waa qurac ama waa geedaha xoogga leh. Hadduusan geedaha ka cabsan godkii buu ugfa daba tagayaa markaasay waxay maahmaaho ka dhigteen, xabaal nin lahaa qarax jira, hadduuse ninku xaal lahayn lama qarax jiro oo meelaha liiliita ooda looma badiyo, laakiin hadduu dad leeyahay dadkiisaas ninba ninkuu ka dad fiican yahay ama ka dad yaa qorrax jira, nin baana neefkoow ka axan weyn yahay neefka meesha lagu qashay ninkuu ka neef fiican yahay lagaaga dadaali og oo bani aadamku waa indho u kas, isla markaas caado u dhigan dadka oo badan oo weyn oo dhexmartay waa inay qori jiiskaa leeyihiinoo neefkaa qori jiiska ah oo agaska ah lagama maarmaan uu yahay. Dadka waxaa jira, ku dhaarto, ku dhaarto waa iga agas iyo tamaato, tomaato waxaa la yiraahdaa neefkii cudur u dhinta agsana waxaa la yiraahdaa dad dhintay neefkii lagu aaso oo qora xabaalka ah xoolaha lagu qabo

daddaan cunin oo lagu dayeyn. Maxaa yeelay culimada barkeed qaba Xaji Cali Cabdiraxmaan amase Xaaji Cali Duulle amase Xaaji Cali Bajeesteen, dhowr magac laha ninkii ahaa, hadalladiisa waxaa ku jiray ma ogolino waa maauhile iyo ari xabaaleedka, xabaalada ariga la geeyo oo qoomeytadaas loo wado in la geeyaa ma banaano uu qabay iyo waa maa uuhila li qayri laahi, muraadkiin maxaad tiraahdeen; ha samaado ha suubannaado, yacni ku seexo cadowgii ku seexo, neefkaan, neefkaan waa birreeyoo roob doon baan u bireeyay; roob doon, maxaa meesha ku jira? Marka la gowracaayo hadaan bisinka lagu gowracin ee lisaanka iyo niyadda meel kale ay u weecdaan, wixii lagaga cararaayay, wamaa uhilli li qayri-llaahi, yaa meesha ah Ilaahay qayrkiis loo gowracay, yacnii loo niyaystay ay ku diida hayaan waa xabaasha waa tii horoo dudumada ahayd, taalooyin bey ka suubin jireen, hadalkiisii waxaa ku jiray ninkaa aan sheegayoo Xaaji Cali ah: taalooyinkaa taagan ma adaa ka tiiga roon, taalooyinkaa meesha la aasay, taalooyinaa loo dhisi jiray. Waxaa soo galay oon-galaynaa shaqiga ah qabriga kan oo jeexa ah waa dabaq waana qibladduu u jeedaa waa in majiisu qorax u dhac xigaan, waa in madaxiisuna meesha ay qorraxda ka soo baxdo xigaan waa in dhafoorka laga bixiyaa marka dhulka la dhigaayo marada marka hore uu dhimmanayaana waa in qofka la yaasimiyaa, yaasiinkaa lagu akhriyaa, agtiisa hala maqalshiiyaa la yiraahdaa, waxaad arkeysaa culimo wahsanaysa oo maydkii dadkii qofkii sakaraadaayo soo yaasiimi ka wahsadeyda oo dadkii tababartay, biyo dadkii sito oo la yiri in biyaha lagu akhriyo ee la cabsiyo iyo in lagu akhriyo waa isla mid, illeen wadaadkii meel dheer haddii laga soo aaday illeyn ma tagi karo waa inuu tuugsadaa yaasiinka korkiisa ina la ag fadhiisto hala maqashiiyo la yiri inay biyo ku akhriyaan ee dadkii loo geeyo la yiri biyaha la cabsiiyay keenee, waa tab, ee ku akhri aa la sheegay lana maqalsiiyo, o agtiisa ha lagu akhriyaa la yiri, haddana tawxiidka dheh Laa Ilaaha Illaa Laahu Muxamadu Rasuulu Laahi, hadhihinaa lagu yiri, agtiisa ku dheh ha qabsado asagu ee maxaa meesha laga boobayaa dheh haddaad tiraah oo dhihi diiddo, nin diidayow xisaabsan yahay, yoow towxiidkii nin diiday noqonine agtiisa ku dhaha: Laa Ilaaha Illaa Laahu Muxamadu Rasuulu Laahi, saas u dheh asagu ha qabsado, laakiin dheh haddaad tiraah, war dheh tawxiidka waxaa suuro gasha sakaraadaa hayee iga aamus dhihi maayee inuu karoo oow iyada yiraah iga aamus hadduu yiraahana nin diiday ayaa meeshaa ka dhashay, haku kuurin agtiisa ku itraah, adiga iska dheh dheh; maxaa yeelay xaddiisa wuxuu qabay: من قال لا إله إلا الله محمد رسول الله خير كلمة فله الجنة, aakhira u dambeeyaa ninkii Laa Ilaaha Illa Laahu uu noqdo falahul janna, aa la yiri, waa meel. Marxaba, mid kalaa la helay oo ka sii wada saxsan, ninkii dhinta isagoo og Ilaahay maahine Ilaah kale inuusan jirin og falahul janna, yuubasan dhihin, ninkii dhinta ee og ,aahine Ilaahay waaxid yahay rasuulkiisana rasuul yahay falahul janna ayaa la yiri:

”و من مات وهو يعلم أن الله واحد لا شريك له و أن محمد رسوله فله الجنة“; marka saasaaba jirtee, adigu maydkaan ha dhihin, yaasiinka maqashii ku ag akhri towxiidka maqashii agtiisa ku dheh haddiise Ilaahay ku

duwo ow qabsado waaba qabsaday, haddii awsan qabsan oo awsan dhihinna Ilaahay addoonkiis waaye ee dheh, dheh inta tiraah ha ku kuurin adigu, waa sakaraadkii haddii ruuxi ka dhaco mafaasiisha inta lulata xubnaha oo kala baxaayo oo saas ah ama far ah ama xusul ah ama kuul, ama jilib ah, isku du intey jilcan yihiin yey kala engegene isu du xubinba xubinteeda u raadi dhinaca la jeedi indhaha laab baarkooda isku soo dheji, labada faruuryood afka isku soo dheji ayey kala tegine ruuxu ka sii helaa qaadaayoo aad aragto asagoo marka neefta ka sii socnayasa, hadhifin oo inta ku dhegto haku sii celinin dheefta saas markaad ku ogaato dheg hayaddii kutaabka sheegay ku dhaq, dad yaqaano oo dhaqa u doon sidii sharcigu sheegay karfantii u raadidani haddeyan kugu qaban ooyan tabar kuu geynin ooyan kaligeed kugu noqon saddex lafaaifa la sheega la faaiftu waa saddex maryood oo fidsan oo la isdul saaraayo oo mid la arkaba xagga iyo xagga isu dhaafayso cimmaamadu waa la sheegay sida loo xiro, qofka dhaqaayaa gacmahiisu inuu maro gashado waa la sheegay, sidaas wixii ahaa ku dadaal intaa markey noqoto waa la qaadahayaa janaasaa lagu tukanayaa, janaasadaas lagu tukaday, hal saf ha noqoto, laba, saddex ha noqoto, labaan hadday rabto ha noqoto qabriga sidii loo gelin jiray yaa loo gelinayaa, la aaso oo jeegadaas ama geed bur ah adag ama dhoobo la gooyay laga geliyay dhinacyada halaga geliyo si uusan u dhicin hay'addii. Turaabtii la sheegay ... saddex jeer ku firdhi iqlaas ku akhri haddii ciidda lagu hoobiyo oo looxa in la saaro lagu hoobiyo laga soo jeediyo, talqiin nimanna qabaan halagu akhriyaa waa laga soo dareeraa, markaa hadday noqoto nimanba waa caado niman baa bun jinaas waa caado bunkaas janaasay si fiican guryaha ugu suubinayaan, nimanna waxaa u caado ah hilibihii la qalay jiray oo aaska ahaa, qolaba sidii ay u tiqiin iyo hayaddii ay tiqiin ayey ugu waxaynayaan, Afciidka bixi neef la yiraahdo ma baaqdo qofka afkiisa ciidda halaga bixiyo, waa caado banii aadamka reer baadiyaha u badan neefkaasay qalanayaane quraamaa la akhrinayaa, sababaadkuu ka horreeyaa nimanna todobaadkey sugaayaan, todobaad haddii la gaaro oo caawa toddobaad la gaarona cashiirada dadkiisa intuu la egyahay ama ninka inta hayjadiisu ay la egtahay ama nasiibkiisu inta uu la egyahay intaas la isugu yimaado ijtimaac lagu yeesho. Ummad ahaa isugu immanaysa qumankaasaa la cunaayaa, quraankii yaa la akhrinaayaa, niman quraankana waa aqriyaan qurmaankaasna waa bixiyaan, nimmana fiiddow baa u daba yaal (laa Ilaaha Ilaa Laahu) ah yaa nimanna u yaala ay u bixiyaan, niman afar boqol iyo sideetan iqlaas ah mara meyd oo la yiraahdaa ay u bixiyaan, duulba waxaa u caado ah sidaas yey dhan la arkaba ay caado ugu aasaan. Waxaa jira dad dibadda jira oo caado ay u tahay qofkii talaado dhinta, inaan la aasin geed in la saaro rako la suubiyo maahane aan iilba ka qodmin oo dhagaxa, ummaddii joogtoo askuntay geedaa u caado ah inay saaraan oo geedkaas inatay rako ka suubiyaan geed aan bahal gaari karin korna aan looga immaan karin korna ay ka dedaan ay ka qabriyaan dhacaankiisna uu dhulka isaga dhammaado ee asagoo toxob iyo lafo ah uu meeshii ku haro. Labadaasi waxay gooni ku tahay dadka caado u

ah; qofka talaado dhinta eyana aasin iyo meesha god aan lagu qodi karin in geedkaa kore la saaroo mooyee. Niman waxaa u caado ah duduntan la yiraahdo dudumo yuugta dadka ku dhaqma, dudumahaas waaweyn oo dhaadheer oo aboorka Ilaahay maslaxo ugu diray yey jiridda ka gooyna hayaan dudunkaa saa dhacaysa, haddii ay dhacdo iyadoo weyn oo meeshaa iska taalla yey qabri ka jeexayaan naftigeedii, qabrigaa ay ka jeexaan eey ku aasayaan qofka, duduntaasoo weyn jiriddii bey ka go'day, markaa ayey taallaa aaladdii ay tiil ayaa lo jeexayaa, markaa ayaa la gelinayaa, maxaa yeelay? Wax la qaadi karo maaha, marxabba. Niman duduntaasaa u magan ah, nimanna geedkaasaa u magan ah aay saaranayaan, nimanna meel ciid leheey u qaadihayaan biyeer meydkuu ku dhaca intii laga duceysto inaan meydki dibadda looga aalinag go'an dadkii niman waxay yeelaan meeshii meydku ku dhintay yey ku aasaayaan, niman waxaa jira caado u leh qubuurro dadkii hore uu isku aasi jiray haddaanu dhibaato weyn ku haleelaynin sidii badan ninka yeelaana (joogaana) waa ka dardaarmaa dadkooduna waa geystaa oo qubuurahaasay isku duugaan si ijtimaaca dambe aan qolana meel u aadin cidina tooduna aanu kala tagin, cunada ay bixinayaana aanu kala taginoo, cunnada ay bixinaayaanna ayan kala taginoo nino beero uga baxdo oo canaabtii martida ay u yeelato saas aawadeed yaa asalkeeduna ka dhashay wixii kaloo dambe oo maax ah, halihii oon bilowga ahaa intaasaan kaga baxayaa. Waa tahay xaaji.

Fiqi Buraale

Arrimahaa oo aad noobalballaarisay ee noocyada faraha badan leh ilaa nabi Aadan ilaa maanta aad soo wadday annagoo waxna maqalnay waxna aanan maqlin aad noo sheegtay, waxaan misna ku weydiin aasidda caynkaas ah markeynu ka nimaadno, xaggii banuaadamka, nabi Aadan ugu horreeyay ee aynu teenna kan dhexgalno. Marka qofku dhinto ee la yaasiminaayo, haddaan la yaasimin horta maxaa dhacaayo oo mid ah, oo uuba waayo, qofkaasu wax yaasiimiya oo meel cidla ah ama dadaan quraan aqoon uu halkaa ku dhinto oo aan la yaasimin, maxaa immanayaayo oo mid ah oo laga qabo oo diintu ka qabto waa mid. Waxaa kale oo jira wax la yiraahdo ee axan iyo agas, axankaa marka la samaynaayo ama agaaska la samaynaayo ama qori jiidka la samaynaayo ma diintaa qabta oo la yiraahdaa illaa waa illaa waa in sidaa loo sameeyaa mase waxaa weeye waxaa loola danleeyahay dadkii soo shaqeeyay xabaashaas ka soo qayb galay ee ku hawshooday iyagu wax ha cunee waa laba. Qodobka kale sida aad u sheegtay dadbaa jiraa marka uu qofku dhinto qonsabeeya oo haddii la maaqo halkaas ku cuna kuwana agaskaas u sameeya haddii waxaaba la sika daayo, maxay diintu ka qabtaa? Waa kow. Midda kale, haddii aynu bil matal diintaas iyada ah sidey ahayd aynu raacno oo caado wixii ah aynu iska dayno, ma faanfaan baa, ama la yiri qoladaas waa lagu caayaayaa, mise diintaa qabta in intaas oo dhan la raaciyo oo loo wado qori jiid suxur ka rugid la sameeyo waxaas bal arrimaha caynkaas ah, noo kala micnee, mida kale dundumada, dundumada weynu ogsoonnahay oo midina awrkaa sameeya, midina weyska ballaarrantahay oo qoor

dheer ma bixiso oo dhinacyaduu aboorku ka saarsaaraa, aboorku goyaanka midna waxaa weeye dundumo yulub baa la yiraahdaayoo sida geela qoorteedu u dheertahay oo saasaa geel u ridaa oo wey dhacdaa wey iska burburtaa, haddaba tan wax lagu aasayo ma tan gunta weyn ee isku fadhida taas ruuxeedi miyaa la kala jeexayaa lagu aasayaa wax mise meeshay ka go'day intii hartay ayaa god looga qaadayaa? Waad mahadsantahay.

Sheekh
Libaan

Kow, haddii dundun gun weyn la helo waa dhul Ilaahay aad u ballaaran waa nasiib, haddii dunduntaas gunta weyn la waayo midaa dhacday, dundun weyn oo inta dhexda laga jeexo oo maydkaaga gashato haddaad hesho waxaa la yiri ilka qurxoon haddii la waayo kuwo qummadka lagu cunaayo waa lama haddiino oo xoog leh doolow haddii la waayona qore toosan oo doolowdii u eg oo suufka lagu jiito meel magaalaa horta waxaa weeye wixii la arki jiray nacas table, dundumo oo dhan nacas table ayaa keenay. Geedkaas oo la raarayey dhaantaa oo meydka la saarayo ayey dhaantaa dhulkii fiicnaay meesha ma yaalo meel dhul fiican leh dundun iyo geed midna loo doonan maayo. Midda tan aad tiri ma kitaabkaa qaba mise waa un caado, agaska muunanatu tajwiid kitaabkaa qaba, tajhiidka qofka keeni muunatu tajwiidka kitaabkaa qaba. Maxna yeelay haloo hormariyaa la yiri maydku hadduu dhinto muunatu tajwiid dadka dugaayo ijaaradiisa weeye kafantii iyo muunatu tajwiidka iyo duyuuntii uu qabay iyo wasiyadii uu wasiyooday oo uu fulis iyo wax saasa sheegtay markaa ka dib dhaxal baa jiraa, intaas markey baxaan yaa dhaxal jiraa, muunatu tajiid waxaa la yiraahdaa duugtaa wixii ku taxaluuqa oo agaskaan aan qofkaasu duugmaynin in la helo maaha ee illeyn meydka dibadduu yaallayaaye ijaaradaas laga qaadanaayo lacag halagu bixiyo, hase lagu bixiyo xoolo nool e waa muunata tajwiid, waa ijaaradii, waa waajib karfantii, waa waajib yaasiinkii, haddaan la yaasimiin, caamada waxay tiraahdaa qofkaas lama yaasimin ee waa baqtiyay, laakiin yaasinka ruuxa haddii korkiisa lagu akhriyo, la maqalsiiyo nafta dhibeeyoo fududeeyaa kitaabadu qabaa, haddiiba naftiiba Alla u fideeyay yaasiin aan lagu khirin jannana uguma baaqanaayo naarna uma galaayo, yaasiinka waa kaas, malayadu waa saas, duugtii, duugtii nimanna waa qabaan talqiintii talqiintii halagu akhriyo nimanna waa diideen, laakiin curfiga carrada yaala waa in talqiintalagu akhriyaayoo sidaad aragtay yaa loogu heeda mariyaa loogu akhrinaayaa, maydka haddii talqiinta lagu akhriyo ummaddaas oo dhan waa tancafinayasa, maqfira waa kuwa Ilaahay u weydiinaya ajir hoobkii yaa la yiraahdaa. Ajir hoobka ku raaci mayno, kuwa diida ee yiri yaan lagu akhriyin, waa isku qilaafsan yihiin. Laakiin nimankaas yaan lagu akhriyin yiri, nimanka ku akhriyaa ku raaci maayaan, haddii lagu akhrin waa la danbaabaana oran maayo, oo maydkaan talqiin lagu akhrin, laakiin doorashadii la doortay in lagu akhriyo dadkaan ka mid ahay; taasuna waa saas.

Fiqi Buraale

Marka wixii kuu dhiman oo meeshaa su'aal kuugu dhiman intii kaskeygii ah yaan ka jawaabi karaa ee bal adigu wax yar ii naso

xaajiyow, sidaynu ogsoonahay ama aynu aragnay ummadda banuu aadamka ama islaam ha ahaato ama gaalo ha ahato qolo waliba siday wax u aasataa hasa yeesh ee qolana diinteeda ama waxay caabuddo ayay gaalada, mulxidka iyo cawaanka, maxaa yeelay umadaha qaar baa lo' caabuda, qaar baa geed, qaar baa waxay caabudaan qorrax, qaar baa wax kale iska caabuda, qaarbaan waxba caabudin dadna diin buu leeyahay oo waa kitaabi weeye, markaa dadkaan soo sheegnay qolo waliba si gooni ah bey wax u aasaan. Haddaba haddii aan teeni u soo noqonno, aynu eegno xagga marka qofku dhinto bil matal Soomaali ahaan qolaba marka uu qofkaasu dhinto oo la aaso, tacsii ayaa la sameeyaa, tacsidaa la sameeyo waxyaalo badan oo aan anigu diido Fiqiburaale ahaan ayaa jira ee waa ka sheekeyn doonaase laakiin bal ragga kale ha iga horreeyo, bil matal waqooyiga si gooni ah bey wax u tacsiiyeeyaan, ee koonfurti si gooni yey wax u tacsiiyadeeyaan, xoolo badan baa baxa, xoolahaas baxa ee waxaa u badan xagga koonfurta laakiin waqooyiga ee nooc kale ayey qaban, taasoo ay sameeyaan qofkaa laga dhintay inayan waxba ka bixinba, oo ummadda kale hadday markaas magaalo tahay cuntada u keento oo samir iyo iimaan Alla ha idinka siiyo ay yiraahdaan; qori qaadkaa markii la sameyo, habeenka saddexaad ama habeenka afaraad loo aqriyo quraan ama haddii la maago ama fiidow saalaxiina waxkastaba ha ahaatee qoladatan qofkii laga dhintay ayaa gab laga siinayaa oo waxaa laga soo kacaayaa dhulal fog la oranaayao hebel baa dhinta ha naloo geeyo, markaasaa halkaasaa un kala soocanaysaa un kala goynba halkaas waxaad mooddaa inuu ku burburaayo maalkii agoonta yaad mooddaa inuu ku burburaayo, aad mooddaa in dembi laga galabsanaayo bal arrintaas caynkaasna waxaan jeclahay aniga oo ragga wada mari doonna arrimaha caynkaas ah sidaas aan u balbalaariyay bal taa arintaa ah salaadow wax nooga taataabo.

Salaad

Mahadsanid Ibraahimow, horta su'aalo badanoo aan anigu shiikha ula ciil qabay iima aadan taabanin, annagu sida horta aan wax u duugno rijinna waa meel, soomaaliduna waa badan tahay anigu dhul badanna xaqiiq ah waan maray, galbeedkaas waan maray meeshaan soomaalidu nimanka wardeyn la yiraahdaa xaga ugu jiraan waan maray dudumaha, middii aad tiraahdeen dundunta ha ii horeeyeen annaga dundun weyn dhulka yagii waxaa ka baxa dudumo waaweeyn oo sartaanay le`eg yihiin aad saad u aragteennaa ma'aqaanee wax salka laga goyn karana maaha, ayadana haddaad fuusho hal saac baad kor u fuulaysaa. Dunduntaas waan arkay anigu dad inta dhexda ku dhifta ku aasaayo ruux waan arkay, dundumadaan dundumo yulugta la yiraahdona waxaan ku aqaan dhulka ciidda ah. Dhulka ciidda dundumaha ku yaal waxaa wax lagu aasi karo in salkeedii hoose inta la jeexo dundunta markay iska dhacdo maahane, waa sidii Ibraahim uu sheegaye anigu kuma arag oo kuma aan ... dudumahaas, laakiin waaweeyn dhulkaas ayey ku badan yihiin wixii Gaalkaciyoo barigeeda tan iyo intaa loo gaaro ama tan iyo dibaddaas la aado yey ku badan yihiin, dhulka kale intaan dhul maray waa yar yihiin dundumihiisa

wax dhuudhuubana jafa oo roobkuba xataa jabiyo weeye oo qaarkood xataa haddaad fuusho kula jabaayo weeye, dundumahaas waan arkay, dad wax ku duugahayaan waa kuwaas, kuwa xaajigu sheegahayaa horta dundumahaas waaweyni waa jiraan waa runtiisa, dhexdaa lagu dhufanayaa dadka waa lagu xabaalaa, dad ku xabaalo waan arkay. Fariid, carada aan anigu aan kolba intaas oo anigu waqooyiga dhulkaas oo dhan kuma aanan arag wax geed wax ku xabaala. Dad la isla raadiyo oo isku dira oo la yiraahdo meel ha lagu xabaalo, oo meel hebla hala geeyo, waa badan yihiin. Caradaasi oo la yiraahdo qabriyadaas ha la geeyo ha loo qaado waa arkay ee qabriga qodiddiisa marka ay tahay oo ay tahay meeshii dhagaxa saas keliya inta loo jeexo dhulka saa loo waxeeyo waayo beerka dhagaxii ma qaloocan karo oo lama qaadi karo yaa qofka qiblada loo duwaa oo la dhigaa, midka kale meel aan golaa guuxan oo sidaas oo kale ah oo qofka marka sidaas loo seexiyo oo saas loogu sii qariyo yuu leeyahay dabadeedna lixaadkaa la saaraa dabadeedna waad garanaysaan, dhul badan baan maray anigu, dhul dhul meesha taan ah, mar haddaad Kismaayo saan aad u dhaaftid aad ka aadid dhinaca Koonfurta ah geed bey saaraan meydka oo dhan geed bey saaraan, geedkaa hoos baa laga daleel-tiraayaa korna waa laga daleel tiraayaa, meel sidii waxay u yeelanaysaa dhubaaka oo kale ah oo sidaas ah loogu waxeeyo, qofku markaa wixii dhacaanna hoos bey u dhacaan.

Geedkaas waa qabri salka hoosena waa ka awdan yahay, halkaasina waan ku arkay. Soomaalidu labo iyo toban (12) caado bey leedahay, xoolaha marka annaga wirwirkaan waqooyi, xoolaha waxaa la yeelaa neefku ninka markuu dhinto qofku agas baan niraahnaa, agas baa la yiraahdaa, neefkaa markaa lagu qalo oo lagu qalaayo wixii markaa la raaciyo, dad waxaa jira anigu oday adeerkey ah afar caado hadduu ku dhaarto aan hunguri loo celin jirin, waa iga agas hadduu ku yiraahdo, weligii agas hunguri ma cunin, caruurta walqalkeeda waa iga mandheer buu oranayaa, ma cuni jirin. Hadduu yiraahdo waa iga goronyo ma looga dhaweynaayo, hilibka wadnaha aniga nafteydaa ka caagan, waa iga goronyo hadduu yiraahdo wacad Allaan loo eegayn. Afartaas waxyaalood, marka agaska dad saasuu u diidaa oo agas baa la yiraahdaa, waa qofka annagu dhintaa agas niraahnaa, neefka lagu daro, waa loo toddobaadeeyaana waa la yiraahdaa, toddobo beri markuu qofku duugan yahayna wixii loo heli karo yaa la raaciyaa oo lagu qalaa, geel buu noqon karaa hadduu ariga yahay waa laba, hadduu geela geela yahay iyo hadduu lo'da yahayna waa neef; waa haddii uu ninku xoolo badan yahay, saddex wey iska noqon karaan, waa laga dhigi karaa taas, waxaan niraahnaa agas, todobaadkaas neef weyn weeye. Ishkinna ama geel ha ahaado, ama lo' ha ahaado iyo wixii ariyoo lagu dari karo taasna waxaan niraahnaa todobaad, toddobaadkii baa la raacinahaya. Labadaas waa dadka aan anigu ka mid ahay, meeshaan Shiikha haddaayay inaan su'aalaan u tashaday, nin reerkii baa la fariisanayaa toddobo habeen iyo toddobo maalmood inay sharci tahay iyo inay boobtahay ma aqaane yaa reerkii la cunaayaa, baabah dam laga

yeelo, toddobo beri yaa la fadhinayaa, waxay yiraahdaan tacsii, anigu tacsiiyada kolleyba dalkaan ku dhashay lagama yaqaano, tacsidaa la leeyahay toddobo beri yaa markii la cunaayaa waxba uun la quurayaa, waa dhulka kan Banaadir ayadana taasaan ku arkay. Fariid, galbeedkaas waxaan ku arkay rag ila arkayna waajiraan, waxay fadhiisanayaan maalinta hore, maalintaas hore xoolaa la qalaayaa, laba habeen iyo laba maalmood la kala tegi maayo, ka dib marka toddobo beri la joogo yey sidii oo kale, marka haddana la joogay qalaayaan saddex toddobaad bey qalaan. Ummaddii dhagax buur wixii saas laga gaaray weeye saddex toddobaad oo is xigay qalaan iyaga intaasaan anigu Soomaalidu ka gaaray, intaan ka arkay iyo intaan ka aqaan waataa, xagga diiniyadana sheekhi baa u jooga iyo su'aasheydii, mahadsanid.

Fiqi Buraale Waa tahay halkanna waxaa ka soo jeeda Daahir Afqarshe oo waqooyi iyo koonfurba iyo galbeedba ka qayb galay ee xaalkana aad wax ugu yaqaano, bal Aw Daahirow xagga caadada iyo xagga aasniinka bal intii aad ka ogtaahay wax nooga taabo adiguna.

Daahir Afqarshe Mahadsanid Fiqiburaalow aaska aynu isu aasno haddaynu nahay Soomaali sidii ay caadadu ahayd ama sidii ay diinteynu tilmaamaysay intiiba horta waxaa naga dhaliilay shiikha, haddaad tiraahdana dib ugu noqo, markaa waa raadkiyoo aad ku tumanayso amase aad jajabinayso, kolkaa waxaad mooddaa in arrintaasi ay tahay arrin dhammaatay. Dhulka aynu wax ku aasanno haddaan yar dib ugu noqdo meelba waxaa kolkaa ka soconaayaa ayaa ku xukumaya haddaynu imminka geedka tilmaanno dadka geedka wax saarayaa, waa dad waayay xabaalaha aan ku aasanno ka dhigta yar leh oo dhibtaa la simman hadba, haddaad aragto Nugaasha aynu innagu aynu degi jirnay meel ku qodmi weydo waxaynu doonan jirnay leh bahashii la oran jirey ee taalooyinkii taalo riyaad yeynu furi jirnay markaasaa qofkii meel ku filan dhigi jirnay oo aan bahal iyo waxba looga baqanayn oo markaad weydo meel kuu qodonta oo iil yeelato oo qofku ku asturto aad weydo, horta kuwaas oo dhan ma aha caadooyin ee waa jarribaad waa meesha ma aragtay hadba sababta ay wax u dhaceen weeye dhulkaa ku xukumaaya halkaa aynu inagu naqaan geed mayd saaran yahay haddii aad aragtid waxaad garanaysaa.